*Sameynta Warqad*

# Ogalaanshaha Qareen



**Buugan yari waxa loogu talo galaya dadka Alberta ee ka fikiraya in ay qoraan ama badelaan warqad ogalaansho qareenka (EPA).** Warqadan ogalaansho waxay kuu ogalaaneysaa inaad qorsheyso mustaqbalka adoo u magacaabaya qof kale inuu maareeyo arimahaaga dhaqaale adoo wali nool lakiin aan awood u lahayn inaad sidaas sameyso. Buugan yari wuxuu bixinayaa kaliya macluumaad guud, maaha talo sharci. Hadii aad u baahan tahay caawimo ama talo faahfaahsan, ka eeg/fiiri dhamaadka buugan yar macluumaad dheeri ah.

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.*
*Wuxuu ku siinayaa  macluumaad guud oo ku sahabsan*
***kaliya sharciga Alberta**. 2020*

Centre for Public Legal Education Alberta

## Iska Fogeyn

**Waxyaabaha buugan yar ka kooban yahay waxaa loo bixiyaa macluumaad guud ahaaneed oo kaliya. Ma aha talo sharci.** Haddii aad qabto dhibaato sharci, waa inaad la tashataa qareen.

Macluumaadka uu ka kooban yahay buugan yari sax ayuu ahaa wakhtigii lasoo saarey. Ogsoonow in laga yaabo inay jiraan isbeddelo ku-xiga oo ka dhigaya macluumaadka mid wakhtigiisii dhaafey (dhacay) waqtiga aad akhrineyso. Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd. ma masuul kama noqon doonto wixii khasaare ah ee ka imanaya ku tiirsanaanta ama ficil lasameeyo (ama aan la sameyn) taas oo ka dhalatay macluumaadkan.

## Mahadnaq

Waxaan jeclaan lahayn inaan uga mahadcelino Hay'adda Sharciga Alberta iyo Waaxda Caddaaladda Canada bixinta maalgalinta hawlaha-shaqo, taas oo suuro galineysa daabacadaha sida tan.

**© Xarunta macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd., Edmonton, Alberta**

**Dib-eegistii u danbeysay 2020**

***Ka hawl-galeysa:* Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta**

Photo Credit: ID 66893170 © Nanditha Tao • Dreamstime.com

Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd, oo ka hawl galaysa Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha Alberta, waa urur aan faa'iido doon ahayn oo hadafkiisu yahay inuu dadka ka caawiyo inay fahmaan sharciga maadaamoo uu saameynayo noloshooda maalin walba.

Waxaanu soo saarnaa buug yar oo ku qoran luqad fudud, bandhigyo, iyo qalab waxbarasho oo kale si dadka looga caawiyo inay aqoonsadaan oo ay uga jawaabaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sharci. Waxaan leenahay barnaamijyo kala duwan, waxaanna bixinnaa macluumaad sharci ah iyo gudbin ku saabsan mawduucyo sharci oo badan. Macluumaad dheeri ah, Fadlan booqo www.cplea.ca.

Centre for Public Legal Education Alberta

#800, 10050 112 Street
Edmonton, Alberta T5K 2J1

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

# Tusmada

**Waa maxay Warqada Ogalaansho Qareen?** **4**

**Sameynta Warqad Ogalaansho** **6**

Awooda Maskaxda 6

Magacaabista Qareen 7

Markhaatiga Waqada Ogalaanshaha Qareenka 8

Awoodaha Qareenka 9

Dhaqan galinta 10

Halkee la dhigayaa warqada Ogalaansha Qareenka 11

**Dib u Eegista Warqada Ogalaanshaha Qareenka** **12**

**Joojinta Warqada Ogalaanshaha Qareenka** **13**

**Maamul xumada Warqada Ogalaansha Qareenka** **14**

**Erey-bixin** **15**

**Macluumaad** **18**

# Waa maxay Warqada Ogalaansho Qareen?

**Warqada Ogalaanshaha Wakiilka,** Warqad qoran, saxeexan, taariikhaysan, makhraatina leh oo u magacaabeysa qof kale (wakiilkaaga) inuu ilaaliyo/daryeelo arimahaaga shakhsiyadeed (kaliya aanu ku jirin dhaqaaluhu).

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan Warqada Ogalaansha Wakiilka, ka eeg buuga yar eeCPLEA loo yaqaan **Warqada Ogalaanshaha Wakiilk**.

Faahfaahin dheeri ah oo la xidhiidha awoodaha guud ee qareenka, ka eeg buuga yare e loo yaqaan **Awoodaha Guud ee Qareenka.**

Alberta dhexdeeda, *Xeerka Warqada Ogalaansho* qareen ayaa abuura Warqada Ogalaansho qareen.

Warqada Ogalaansho qareenka (EPA), waa warqad qoran, saxeexan, taariikhaysan markhaatina leh taas oo siineysa qof kale xaquuqda uu kuugu matalayo adiga waxayaabaha la xidhiidha arimaha dhaqaale adoo wali nool.

Warqadani ma siineyso qofka awooda uu ku sameeyo go’aano ku sahabsan daryeelkaaga caafimaad ama go’aamadaada shakhsiyadeed – Taasi waxaad u baahan tahay warqad gaar ah oo loo yaqaan Warqada Ogalaanshaha Shakhsiga/Gaarka ah (waa warqad kuu ogalaaneysa inaad magacowdo qof aad aaminto kuu sameeya go’aamada caafimaad marka awoodada maskaxda weydo).

Markaad sameyso warqada ogalaansaha Qareenka, waxaad tahay “**Ku-deeqaha**” waxaanad siineysaa ogalaanshahaaga qof kale (**Qareenkaaga**)si uu uga shaqeeyo arimahaaga dhaqaale. Warqada ogalaanshahaagu kaliya waxay shaqeynaysaa intaad nooshahay waxayna dhamaaneysaa markaad dhimato.

Warqadani waa in ay tilmaamtaa in ay sii shaqeyneyso xataa hadaad weydo awoodada maskaxeed. Hadii warqadaada ogalaanshahu aaney cadeyn aritan, ma noqoneyso warqad ogalaansho, lamana isticmaali karo markaad weydo **caafimaadkaaga maskaxeed**.

**Awood maxkaxeed** macneheedu waxa weeyi awooda lagu fahmayo macluumaadka la xidhiidha sameynta go’aan iyo awood lagu fahmayo caqabadaha muuqda ee go’aanka.

Waa inaad haystaa warqada ogalaanshaha qareenka maxaa yeelay hadii aad ka cabato dhaawac halis ah ama xanuun, waxa lagayaabaa inaad awoodi weydo daryeelka arimahaaga dhaqaale. Tani waa caafimaad daro maskaxeed ama awood daro maskaxeed. Sharciga Alberta iskama ogalaanayo in qof kale kuu sameeyo go'aamo dhaqaale. Diyaarinta imika warqada ogalaanshaha, inta aad maskxiyan u awoodo, waxaad ilaalineysaa hubina kartaa in go'aamadaada dhaqaale uu sameyn dooono qof garanaya adiga iyo waxaad rabto.

Bilaa warqad ogalaaansho, qoyskaaga ama cidkale oo daneyneysa waa inuu ka codsadaa maxkamada Alberta xeerka Masuuliyada iyo sii-haynta si uu u noqdo sii-haye-haaga. Habkanmaxkamadu wuxuu qaadan karaa bilo, waana adayg, kharash badana wuu ku bixi karaa. Waxa sidoo kale ka dhalan karta in qof kuu maamulaya dhaqaalahaaga adoon aanad dooran.

Warqada Ogalaanshahu waxa suurto gal inaaney ka shaqeyn meel ka baxsan Alberta.

Warqada Ogalaanshahu waxay shaqeysaa ilaa:

- Aad geeriyooto;
- aad joojiso (ka noqoto);
- Maxkamadi goaamiso inaan warqada Ogalaanshuhu haba yaraatee shaqeyneyn;
- Maxkamaddu waxay kuu damaanad qaadaysaa **dalab wakiilnimo** iyadoo adiga ku tixgalinaysa
- Qareenkaagii wuu dhintay ama wuu kaa tagay ama dalab wakiilnimo ayaa la siiyay qofkaas mana jiro **Qareen kale** oo la wareegi kara.

Waxaad yeelan kartaa in ka badan hal Warqad Ogalaansho oo sax ah iyagna. Tusaale ahaan, waxa suurto gal ah inaad ulahaato warqado kala duwan ujeedooyin kala duwan. Waxay noqon kartaa jahawareer hadii in ka badan hal warqad siineyso awoodo isku mid ah dad kala duwan.Sidoo kale, hadii warqadahaagu isku burinayaan arimaha qaar, tilmaamta cusub ayaa sax ah oo tilmaamamta/fariinta hore ma noqoneyso sax.

**Amarka Masuulnimada,** ee qof **weyn**, amar maxkamadi sameysay kuna xusan xeerka 26 ee Masuulinimada qof weyn iyo Aaminaada ee Alberta kana jawaabaya codsiga qofka codsanaya in loo magacaabo masuulka qof weyn.

**Sii-haye,** qof **Weyn**, Qof loogu magacaabey sii-haye amar u dhiibasho lagu sameeyey qeybta 46 ee xeerka Masuuliyada iyo Sii-haynta dadka waawyn ee Alberta. Sii-hayaha qof weyni (qof qaan-gaadh ah wax u haya) wuxuu awood u leeyahay inuu u sameeyo go'aamo maaliyadeed qof-kaasi weyn.

**Wakiil kale,** Qof lagu magacabey dikreeto/tilmaam shakhsiyadeed si uu u hawl-galo hadii wakiil kale aanu matali Karin.

# Sameynta Warqad Ogalaansho

Alberta dhexdeeda, warqada ogalaanshahu waa in ay noqotaa qoraal, oo ay saxeexeen, taariikhna u yeeleen adiga (Ku-deeqaha) iyo markhatiga, idinkoo wada xaadira. Waa inaad ahaataa 18 jir da'da am aka weyn tahay, waa inaad sidoo kale, wakhtiga saxeexa, fahantaa qaabka iyo saameynta warqada.

Hadii aanad jidh ahaan u awoodin inaad saxeexdo, warqadaada ogalaansha waxa kuu sexeexi kara qof kale, lakiin qofkaasi ma noqon karo qareenka loo magacaabey ama **xaaska/sayga** ama **lamaane** qareenkaaga.

Intaas waxa dheer, si ay warqadu u noqoto warqad ogalaansho qareen, **waa in ay** tilmaamtaa in ay sii shaqeyneyso ama sii jireysa, marka Ku deequhu/bixiyuhu waayo awoodiisa maskaxeed.

Waxaad sameyn kartaa warqadaada ogalaanshaha qareen ama waxa kaa caawin kara looyar.

## Awooda Maskaxda

Lahaanshaha awood ee loogu baahan yahay sameynta warqada ogalaanshaha qareenka macneheedu waxa weeyi inaad:

- garaneyso nooca hantiya eed haysato iyo qiyaasta qiimeheeda;
- ka warheyso waajibaadka kaa saran dadka kugu diirsan dhaqaale ahaan;
- ogtahay nooca masuuliyada aad siineyso qareenkaaga;
- ogtahay in qareenkaaga looga baahan yahay sharxida go'aamada uu ka qaadato arimahaaga dhaqaale;
- ogatahay in ilaa iyo inta aad maskax ahaan u awoodo , aad ka noqon (joojin) karto warqada ogalaanshaha qareenka;
- fahansan tahay hadii qareenkaagu aanu u maamulin hantidaada si fiican, in qiimaheedu hoos u dhacayp; iyo
- Fahansantahay in badanaa uu jirto fursad qareenkaagu six un ugu isticmaali karo ogalaanshahaaga.

Hadii aad ka warwarsan tahay in qof carqaladeeyo awoodaada maskaxeed, waxaad qabsan kartaa looyar si uu kuugu diyaariyo warqada ogalaanshaha qareenka. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa dhakhtarkaaga warqad sheegeysa inaad maskax ahaan u awoodo.

Xataa hadii aad qaado talaabooyinkan, waxa marwalba suurto gal ah in qofku weydiisto garsoore inuu baabiyo warqadaada ogalaanshaha qareenka, garsooruhuna sidaasi ayuu sameyn karaa hadii ay u tixgaliyaan in ay tahay dantaada.

## Magacaabista Qareen

Ereyga "Qareen" waxa loola jeedaa qofka ama dadka aad u doorato in ay kugu matalaan adiga arimahaaga dhaqaale. Qareenkaagu waa inuu jiraa 18 sano da'ahaan maskax ahaan awoodaa.

Qareenkaagu sidoo kale waa inuu:

- noqdaa daacad la iskuna haleyn karaa;
- awood u leeyahay qabashada shaqo fiican;
- wakhti u hayaa, rabaana inuu qabto shqada;
- and ka war hayaa rabitaankaaga iyo ujeedkaaga guud; iyo
- Inuu noqdo qof aad isku iskugu haleyn karto gudashada danaaga.

Waa haboon tahay, laakiin qasab ma ahan, qareenkaaga inuu ku noolaado isla gobolka aad ku nooshahay.

Waxaad magacaabi kartaa hal ama dhowr qareen si ay u kuu mataaln isla wakhti **(qareen caawiyayaal)**. Waxaad codsan kartaa in qareen-caawiyayaashaadu uu si wadajir ah kuu wada matalaan("si isku duuban") ama waxay u shaqeyn karaan si gaar gaar ah iyo si wada-jir ahba ("si shakhsi shakhsi ah iyo si wadajir ahba"). Haddii ay si gooni ah u wada shaqeeyaan si gooni-gooni ah iyo si wado jir ahba, markaa mid ka mid ah Qareenadu waxay awoodi doonaan inuu keligii ku matol adiga. Haddii mid ka maqan yahay ama jiran yahay, tusaale ahaan, kan kale wuxuu weli awoodi karaa inuu saxiixo jeeg ama uu bixiyo tilmaamo isagoo ku matalaya. Haddii aadan sheegin in ay si gooni-gooni ah u shaqeyn karaan, waxa walba si wada-jir ah ayey u qaban doonaan. Ogow in magacaabida qareen caawiyaashu ka dhigi karto arintamaha kuw adag hadii go'aamada loo baahdo in degdeg loo sameeyo.

Hadii aad magacowdo qareen caawiyayaal, waa inaad ku dartaa hab ay ku xalin karaan khilaafyada hadii ay soo baxaan.

**Xaas,** Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/qabo.

**Lamaane isku-tiirsan,** Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha,** Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan masuuliyadaha qareenka, ka eeg buuga yare e **CPLEA-ga ee loo yaqaan Noqoshada Qareen**.

**Hanti,** Waxaad leedahay. Hantida waxa ka mid noqon kara ashyaada (shayada) sida lacag, dhul, maal-gashi iyo hantida-shakhsiga sida dahab iyo alaabta guriga.

**U dhiibid hanti si ku meel-gaadh ah,** U dhiibid hanti si ku meel gaadh ah waa nidaam lagu haynayo hantida. Shakhsi ama shirkad, loo yaqaan sii-haye, ayaa u haya maamulana hantida qof kale ama dadka kale, oo loo yaqaan Helayaasha.

**Qaate,** Loo **Haye**, Qof (shakhsi ama urur) kasoo kahela faa'idado hantida cid loo hayo inta uu qaan gaadhayo.

Waa inaad sidoo kale magacowdaa ugu yaraan hal **Badel Qareen** kaasi oo matali kara hadii qareenkaagu dhinto, noqdo mid maskax ahaan aan awoodin ama aan ku matali Karin. Hadii aad magacowdo dhowr badel, waa inaad cadeysaa sida ay u kala horeyanayaa.

**Hadii qareenkaagu doonayo inuu iskaga daayo marka warqada ogalaanshaha qareenka shaqeyso qareenkaaguna bilaabo inuu ku matalo, qareenkaagu waa inuu ka codsadaa maxkamada fasax shaqo ka taga.** Tani waxa lo yaqaan "Iskaga bixid". Hadii maxkamdu u ogalaato qareenkaaga inuu iskaga baxo, qareenkaagu waa inuu ku siiyaa ogeysiiska iskaga bixitaankiisa/tagi-taankiisa.

Hadii midkoona qareenada, qareen caawiyayasha ama badelayaasha aad ku magacowdey warqadaada ogalaanshaha qareenka aaney ku matali Karin, warqadaada ogalaanshu ansax ma noqneyso, waxa waajb ahna inaad sameyso mid cusub.

## Markhaatiga Waqada Ogalaanshaha Qareenka

Qofkasta oo da'diisu tahay 18 sano jir am aka weyn oo maskaxiyan u awooda markhaati wuu ka noqon karaa warqada ogalaanshaha qareenka. Adiga iyo markhaatigaagu waa inaad xaadir u ahaataan si wado jir ah midkiinba mid kalena arkaa isagoo saxeexaya warqada si ay sax u noqoto. Markhaatigu waa inuu daacad noqdaa iskana diidaa inuu markhaati ka noqdo warqada ogalaanshaha qareenka hadii uu haysto sabab uu su'aal ku galiyo awoodada maskaxeed.

Dadka qaar ma gali karaan markhaati:

- Qofkasta oo ka yar da'da 18;
- qofkasta oon maskaxiyan u awoodin;
- qofka loo magacaabey qareen ahaan (oy ku jiraan qareen-caawiyayaasha ama badalayaasha);
- Xaaska/sayga ama lamaanaha qofka loo magacaabey qareenka;
- Xaaska/sayga ama lamaanaha qof bixinaya ogalaanshaha;
- qofka usaxeexay warqada ogalaanshaha isagoo matalaya bixiyaha ogalaansha; ama
- xaaska/sayga ama lamaanaha qofka saxeexay warqada isagoo matalaya bixiyaha ogalaansha.

# Awoodaha Qareenka

Qareenkaagu wuxuu awoodi doonaa inuu qabto waxkasta oo aad qaban karto oo la xidhiidha dhaqaalahaaga, ilaa aad xad u cayinto awoodihiisa.

Waa inaad tixgalisaa nooca go'aamo dhaqaale ee qareenkaagu u baahan doono inuu sameeyo. Ma noqon doontaa kaliya bangiga iyo bixinta biilasha? Mise haysataa maal-gashiyo ama kireyn hanti oo qareenkaagu u baahan doono inuu maamul?

Qareenkaagu wuxuu karaa:

- la tacaalista hantidaada ma guurtada ah, oy ku jiraan soo iibinta iyo sii iibinta hantida ( hadii aad khaasatan siiso awoodan);
- Diyaariyo soona gudbiyo dakhligaaga cashuurta kuuna sameeyana go'aan kale oo kaste;
- u isticmaala **hantidaada** daryeelkaga, waxbarashaadaa, faaidooyinkaaga, daryeelkaaga caafimaad iyo taageeradaa;
- **u isticmaalo hantidaada daryeelka** iyo taageerista xaaskaaga/saygaaga ama caruurtaada;
- shaqaaleysiiyo dadku si ay kuu caawiyaan sida adeeg-bixiyayaasha, looyarada, ama xisaabiyayaasha;
- qaateyaasha ama dhaxlayaasha kale;
- la tacaalo dano ganacsi oo kaste ama maaligashi ood leedahay; ama
- Bixiyo kharashaadka goaamada shakhsiyadeed ee lagu sameeyey tilmaamahaga.

Xeer-ilaaliyeyaashu waa inay raacaan sharciyada maalgashi maaliyadeed ee ku qoran xeerka amaanda ee Alberta. Sharciga amaanadu wuxuu dejiyaa sharciyo ku saabsan noocyada maalgashiga ay sii-hayayaashu ku matali karaan qof kale.

**Waxa suurto gal ah in warqadaada ogalaanshuhu shaqeyso wakhti gaaban ama in ay shaqeyso wakhti dheer. Waxa muhiim inaad qorsheyso wakhtiga dheer.**

Qareenku ma sameyn karo:

- inuu kuu badelo ama kuu sameeyo Dardaaran cusub;
- inuu kuu bedelo ama sameeyo warqad ogalaansho qareen cusub;
- inuu kuu badelo ama sameeyo tilmaamo shakhsi.
- inuu badelo magacaabistaada dhaxle RRSPs-kaaga, hawl-gabyada ama cameysiyada nolosha; ama
- inuu sameeyo go'aamo ku sahabsan caafimaadkaaga ama arimahaaga shakhsi.

Xasuuso in hadii aad xadido awoodaha qareenkaaga, in aaney awoodin Karin sameynta go'aamada ka baxsan awoodihiisa. Hadii aanu qofna haysan go'aamadan, waa inuu qof ka codsadaa maxkamada inuu noqdo **sii-hayaha**.

Haddii aad rabto Qareenkaaga in lagu siiyo lacag shaqada uu ku shaqeynayo adiga, waa inaad si gaar ah ugu sheegtaa warqadaada ogalaansha qareenkaga. Haddii aadan waxba ku sheegin warqada-, markaa Qareenkaagu wuxuu ka dalban karaa magdhow si macquul ah oo caddaalad ah matalitaankaaga awgeed.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad ku darto shuruudo sheegaysa in qareenkaaga looga baahan yahay in ku u ilaaliyo macluumaadkaaga lacageed qarsoodi. Qareenkaaga wuxuu ubaahan yahay inuu u sheego macluumaad ku filan si uu u guto waajibaadkiisa iyo inuu adeeco sharciga. Haddii kale, Qareenkaaga waa inuu ixtiraamo asturnaantaada.

## Dhaqan galinta

Warqadaada ogalaanshaha qareenka waxa loo dhaqan galin karaa labo hab midkood:

1. Waxay dhaqan gali kartaa isla markiiba marka la saxiixo wayna sii shaqeyneysaa xitaa haddii aad maskax ahaan awoodi Karin  wakhti dambe; ama
2. Waxay dhaqan-gali kartaa kaliya taariikh go'an oo mustaqbalka ah ama dhacdida dhacdo gaar ah. Dhacdo gaar ah waxay noqon kartaa markaad weydo awoodda maskaxda. Tani waxaa loo yaqaan Warqada Ogalaanshaha Qareeenka "Deg-dega"madaamoo ay shaqeyso marka dhacdo gaar ahi dhacdo.

   Warqadadaada Ogalaanshuhu waa in ay sheegtaa cida ay tahay sameyso bayaan qoran oo ah in taariikhdan ama dhacdadan cayiman ay dhaceen. Awoodan waxaad siin kartaa qareenkaaga ama qofkale. Hadii Warqadadada ogalaanshuhu aaney sheegeyn cida sameyneysa bayaankan qoran, waa in labo shaqaale caafimaad sameeyaan bayan qoran.

## Halkee la dhigayaa warqada Ogalaansha Qareenka

Marka warqadaada ogalaansha qareenka la dhameystiro lana saxeexo, waxaad ku sameyn kartaa mid ama in kabadan kuwan soo socda:

1. Waxaad dhgi kartaa wwarqadaada ogalaansha qareenka ee orajinalka/asalka ah meel amaan ah oo qareenkaagu ogyahay uuna heli karo si degdeg hadii loo baahdo.
2. Waxaa sameyn kartaa dhowr warqad ogalaansho oo orojinal ah si aad u haysan karto xabad asal/orojinal ah sidoo kalena aad siiso mid orojinal ah qareenkaaga iyo badelkiisa.
3. Waad u dhibi kartaa orjinalka qof aamin ah, sida looyar, iyadoo leh tilmaamo cayiman oo sheegaya marka la bixinayo. Hadii aad sameyso tan, xasuuso in ay sanado qaadan karto ka hor inta warqadaada ogalaanshaha loobaahan qofka aad kaga tagteyna aanu guurin ama dhiman.
4. Waxaad ogeysiin kartaa xubnaha qoyskaaga, xisaabiyayaashaada ama la taliyayaasha kale ee aaminka ah inaad haysato warqada ogalaansha qareenka. Waxaad sidoo kale siin kartaa iyaga nuqun/koobi. Waa inaad taxdaa dadka aad siisey nuqunlka si aad u ogeysiin karto isbadalka mustaqbalka.

Inta ugu badan, nuqul/koobi warqadaada ogalaanshahu kuguma filna. Dadka ama shirkadaha aad la macaamileyso waxay u baahan doonaan in ay arkaan orojinalka/asalka ama **nuqul sharciyeysan**.

**Nuqul la sharciyeeyey (nootaayo saxeexdey),** Warqad ay u ansaxisay nootaayo nuqul run ah oo original ah.

Alberta, nootaayadu waa qof ay siiyeen awoodo *nootooyinka iyo komishaneerada xeerku* si uu u xaqiijiyo warqadaha.

# Dib u Eegista Warqada Ogalaanshaha Qareenka

Dib u eeg warqaadada ogalaansha Qareenka:

- ugu yaraan hal mar sanadkiiba;
- markasta oo ay jiraan ay isbadelo muhiim ahi ku yimaadaan xidhiidhka aad la leedahay dadka kale;
- Hadii xub ka mid qoyskaaga, ama kuwo kale ee kuu dhow ay is furaan, guursadaan ama geeriyoodaan;
- hadii qareenkaagu dhinto ama yidhaahdo ma awood ama ma rabo inaan ku matalo adiga; ama
- Hadii ay jiraan isbadelo muhiim ah oo ku yimaada caafimaadkaaga.

Ka dib markaad dib u eegto warqaadada ogalaanshaha qareenka, waxaad go'aansan kartaa in ay u baahan tahay wax ka badal.

**Hadii aad tahay dhalad si caadiyana ad u degan tahay, sharcigu wuu ka duwanaanayaa. Xeerka Hindiga ayaa ku qabanaya.**

Faahfaahin dheeraad ah, la xidhiidh xarunta waxbarashada ee

**Bearpaw**

780.428.0187 ama www.bearpaweducation.ca or

**Indigenous and Northern Affairs Canada**

https://www.aadnc-aandc.gc.ca/eng/1100100032357/1100100032361

# Joojinta Warqada Ogalaanshaha Qareenka

Alberta, guursashada ama galitaanka xiriirka lamaane ma saameynayo ansaxnimada warqada ogalaanshaha. Sidoo kale kala tagis, furniin ama dhimasho ma saameyneyso.

Ilaa inta aad leedahay awood maskaxeed, waad ka noqon kartaa warqadaada ogalaanshaha qareenka wakhti kasta. Tan waxaa loo samayn karaa siyaabo dhowr ah:

1. Warqadaada ogalaanshuhu waxay sheegi kartaa in dib looga noqdey dhacdooyin garaa awgeed sidaas darteedana warqadaada ogalaansha la joojiyey taariikhda dhacdadaasi.
2. Waxaad sameyn kartaa warqad ogalaansho cusub oo burineysa/beenineysa warqadii hore. Warqadaadii ogalaanshehee hore waa la joojinayaa inta la xidhiidha burinta inta kale sax ayey haaneysaa wali.
3. Waxaad sameyn kartaa warqad ogalaansho oo cusub taas oo si cad u sheegeysa ka noqoshada dhamaan warqadihii hore.
4. Waxaad qori kartaa bayaan cusub oo si cad u sheegaya inaad ka noqoneyso/joojineyso warqada ogalaanshaha qareenka.

**Macna ma leh sida aad u joojiso/uga noqoto warqadaada ogalaanshaha, markasta warqadu waa in ay noqotaa qoraal.**

Markaad joojiso warqada ogalaanshaha qareenka, waa inaad:

- Isla markiiba waa inad u sheegtaa qareenkaaga maxaa yeelay fasax uma haysataan ay kugu sii mataalan adiga. Hadii aanad u sheegin qareenkaaga, waxa lagayaaba inaanu ogaan in uuna fasax u haysan sidaas darteedna uu u sii wado shaqada. Waxa layaabaa in sharcigu kuu qabto talaabo kasta oo qareenkaagu qaado ilaa iyo aad ogeysiiso inaad ka noqotey Warqada Ogalaansha Qareenka; iyo
- ogeysiisaa dadka kale eek u lugleh arimahaaga dhaqaale sida xisaabiyayaasha, looyarada, shuraakada ganacsi, baananka, iwm. Si aaney uga  qaadan tilmaamo qareenkaaga; iyo

- Heshaa orojinalka (hada laga noqdey) Warqada Ogalaanshaha Qareenka iyo cidkas oo kale oo haysata nuqul ama orojinal, ka dibna aad baabisaa dhamaan si aad iskaga ilaaliso jaho-wareer.

Hadii aad leedahay guri amah hanti kale oo ma guurto ah, waxaad qabsan kartaa looyar kuu diwaangaliya ogeysiiska ka joojinta magaca ama hantida si looga hortago macaamilkasta oon sharci ahayn.

# Maamul xumada Warqada Ogalaansha Qareenka

Sharciga way kasoo horjeedaa in su xun loo isticmaalo warqda ogalaanshaha qareenka. Qareenkaagu waa ilaaliyaa danahaaga.

Hadii qareenkaagu aanu ilaalineyn danahaaga, waxa jira wadooyin kuu banaan:

1. hadii wali aad leedahay awood maskaxeed, waxaad ka joojin kartaa Warqada Ogalanshaha Qareenka mid cusubna waad sameyn kartaa (Magacow Qareen cusub); ama
2. Waxaad ka dalban kartaa qareenkaaga warbixin dhameystiran oo ku sahabsan dhamaan go'aamada ay ku sameeyeen Warqadaada Ogalaanshaha Qareenka. Hadii qareenkaagu aanu bixin warbixintan, waxaad ka codsan kartaa maxkamada in amarto inuu bixiyo xisaabtan. Hadii aanad haba yaraatee wax awood ah u lahayn, qofkasta oo daneynaya ayaa kaaga codsan kara maxkamada amarkan. Maxkamadu waxay bixin kartaa markasta oo xisaabtan ah marka sax u aragto.
3. Cidkasta oo daneynaysa ayaa ka codsan karta maxkamada baabi'inta Warqada Ogalaanshaha Qareenka. Maxkamadu way joojin kartaa hadii ay u aragto dantaada in ay tahay arintani. Maxkamadu kuuma magacaabi karto qareen cusub lakiin waxay u gudbin kartaa taasi qof daneynaya oo keenaya codsiga amarka masuuliyada waxaaney u magacaabi kartaa qof inuu noqdo masuulka ku meel gaadhka ah ilaa amarka masuulnida lasoo saaro.

*Xeerka Warqadaha Ogalaanshaha Qareenku* ma sheegyo "cida daneyneysaa" cida ay atahay. Maxkamada ayaa awoodan leh.

# Erey-bixin

**Amarka sii-haynta**

Qof **Weyn**, Amar maxkamadeed oo lagu sameeyey qeybta 46 ee xeerka Masuuliyada iyo Sii-haynta dadka waaweyn ee Alberta iyadoo laga jawaabayo codsiga qofka codsanaya in loo magacaabo u-haynta hanti qof weyn.

**Dardaaran**

Bayaan sharci oo sheegaya sida qof uu rabo in loola tacaalo hantidiisa markuu dhintu ka dib.

**Ku deeqe**

Qofk ogalaada inuu qareen matalo.

**Lamaane isku-tiirsan**

Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

**Wakiil**

Qof lagu magacaabey tilmaam shakhsiyadeed si uu u gaadho go'aamo shakhsi isagoo matalaya tilmaam/amar bixiyaha.

**Wakiil kale**

Qof lagu magacabey dikreeto/tilmaam shakhsiyadeed si uu u hawl-galo hadii wakiil kale aanu matali Karin.

**Qaate**

**Hantiyeed**, Qof (shakhsi ama urur) kazoo dhaxla dhamaan ama qeyb ka mid ah hantida qof ka dhintey.

Loo **Haye**, Qof (shakhsi ama urur) kasoo kahela faa'idado hantida cid loo hayo inta uu qaan gaadhayo.

**Qareen**

A person who is named to act on behalf of the Donor in a Power of Attorney or an Enduring Power of Attorney. Qof loo magacaabey inuu matalo deeq-bixiye

**Qareen-weheliye**

Qareen leh awoodo la mid ah kuwa qareenka kale. Awoodahu waxa suurto-gal ah in ay ka sareeyaan go'aamo dhaqaale ama go'aamo dhaqaale oo kala duduwan. Qareen-weheliyeyaashu waxay yeelan karaan 'awoodo wada jir ah' (waa in ay go'aan uga gaadhaan shayada si wada jir ah) ama 'awoodo ' dhowrn ah wado jirna ah' ( Labada wakiil midkood ayaa go'aan ka gaadhi kara).

**Sameeye**

Qofka bixiya tilmaamaha-shakhsiyadeed.

**Sii-haye**

qof **Weyn**, Qof loogu magacaabey sii-haye amar u dhiibasho lagu sameeyey qeybta 46 ee xeerka Masuuliyada iyo Sii-haynta dadka waawyn ee Alberta. Sii-hayaha qof weyni (qof qaan-gaadh ah wax u haya) wuxuu awood u leeyahay inuu u sameeyo go'aamo maaliyadeed qof-kaasi weyn.

Ilaaliye, qofka ka masuulka ah u haynta iyo umaamulida dhamaan hantida lagu aaminey qofka iska ka faaideysanaya.

**Wakiilnimada qareenka**

Nooc matalaad qareen oo sii socota xataa hadii qof ku lumiyo awooda maskaxdiisa.

**Warqada Ogalaansha Qareenka**

Warqad (dumenti) qoran, saxeexan, taariikhaysan oo makhraatina leh kaasi oo siinaya qof kale (qareenkaaga) xaquuqda inuu kugu matalo adiga waxyaabaha la xidhiidha arimahaaga dhaqaale inta aad nooshahay. Warqada Ogalaanshaha qareenku waxay noqon kartaa xeer gaar ah, mudo cayiman ah, ama si guud dabiiciyan.

**Warqada Ogalaanshaha Wakiilka**

Warqad qoran, saxeexan, taariikhaysan, makhraatina leh oo u magacaabeysa qof kale (wakiilkaaga) inuu ilaaliyo/daryeelo arimahaaga shakhsiyadeed (kaliya aanu ku jirin dhaqaaluhu).

**Xaas**

Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/qabo.

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha**

Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

# Macluumaad

## Shuruucda

### Daabacaada Alberta Queen

nuqulo daacabacaad xeerar iyo shuruuc bilaasha

Website: www.qp.alberta.ca

## Dawlada iyo Adeeyada maxkamadaha

### Maamulka Alberta

www.alberta.ca

### Alberta Courts

www.albertacourts.ca

### Resolution and Court Administration Services (RCAS)

Qanuunada iyo Adeegyada Taageero ee Alberta.

La xidhiidh xarunta: 1.855.738.4747

https://www.alberta.ca/rcas.aspx

### Caawimada Alberta

Hel in ka badan 30 barnaamij iyo 120 adeeg bulsho.

Bilaash ku wac: 1.877.644.9992

### Xafiiska Daryeelka dadweynaha iyo Amaanada

Adeegyada iyo caawimada dadka Alberta ee jilicdasan iyo qoysaskooda.

Bilaash ku wac: 310.0000 then 780.422.1868

www.alberta.ca/office-public-guardian-trustee.aspx

## Adeegyada Sharciga

### Adeega Sharci yaqaanada looyarada Alberta

Waxay bixisaa magacyada saddex looyar. Loorkastaaba wuxu bixiyaa saacad badhkeed oo la tali bilaash ah.

Bilaash ku wac: 1.800.661.1095

https://www.lawsociety.ab.ca/public/lawyer-referral/

### Caawimada Sharciga ee Alberta

Bilaash ku wac: 1.866.845.3425

www.legalaid.ab.ca

### Shaybaadhka Edmonton

Shaybaadhka Edmonton. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.702.1725

www.eclc.ca

### Hagitaanka Sharci ee Calgary Legal

Shaybaadhka Calgary. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.234.9266

http://clg.ab.ca

### Shaybaadhka Bulshada– Central Alberta

Shaybaadhka Alberta. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

**Central Alberta:** 403.314.9129

**Fort McMurray:** 587.674.2282

**Lloydminster:** 587.789.0727

**Medicine Hat:** 403.712.1021

www.communitylegalclinic.net

### Hagaha Sharci ee Grande Prairie

Shaybaadhka Grande Prairie Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.882.0036

www.gplg.ca

### Hagaha Sharci ee Lethbridge

Legal clinic in Lethbridge. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.380.6338

http://www.lethbridgelegalguidance.ca/

### Wac Sharciga

Warbixin la duubey oo diyaar 24 saac maaliwalba 7 maalmood ee wiiga.

Bilaash ku wac: 1.800.332.1091

http://clg.ab.ca/programs-services/dial-a-law/

## Macluumaad

### Ilaalinta Dadka  daryeelka ku jira

Soo sheeg xadgudubyada waayeelka ka helaya daryeel ama caawimo adeega dadweynaha ku deeqeen.

Bilaash ku wac: 1.888.357.9339

www.alberta.ca/report-abuse-to-protection-for-persons-in-care.aspx

### Shabakada Aqoonta Dadka waayeelka ah

Macluumaad sharci oo ku sahabsan dadka waayeelka ah.

www.oaknet.ca

### Midowga ururka sare ee Edmonton (SAGE)

780.423.5510

www.MySage.ca

### Xarunta Kerby (Calgary)

403.265.0661

https://www.kerbycentre.com/

### Xarunta macluumaadka ee Golden Circle Senior Resource Centre (Calgary)

403.343.6074

www.goldencircle.ca

# Notes

# Notes

# Notes

*Sameynta Warqad*

# Ogalaanshaha Qareen

Buugani waa mid ka mid ah daabacado badan oo ay soo saartay Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta. Dhamaan daabacaadaha waxa si bilaash ah loogala degi kara iyadoo la bookhanayo www.cplea.ca/publications or www.cplea.ca/store

Daabacadaha kale ee la xiriira mawduucaan ee laga yaabo inaad daneyneyso wax ka mid ah:

- Dardaarmid
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Noqoshada Wakiil
- Noqoshada Wakiil Shakhsi
- Noqoshada Qareen ku xusan Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Awoodaha Guud Qareenka
- Xeerka Masuulnimada iyo Amaanada
- Ayey/Awow iyo Caruurtaada
- Xadgub Waayeel

Waxa Mahadnaq gaar ah iska leh ururka Sharciga Alberta iyo laanta cadaalada Kanada bixintooda kharashka hawl-galka, oo suurto galiya daabacaadahan oo kale.

Alberta LAW FOUNDATION

Department of Justice Canada

Ministère de la Justice Canada

**We want to know what you think!**

Take our one-minute survey

Capture this QR code with your phone camera or go to https://bit.ly/2TgYzTk

Centre for Public Legal Education Alberta (cplea)

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.*
*Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan **kaliya sharciga Alberta**. 2020*